# Tani waa fursada midnimada.

## Ma bedeli karno taariikhdeena, laakiin wadajir ayaan horay ugu socon karnaa.

14ka Oktoobar, dadka Australiyaanka ahi waxay u codayn doonaan doorasho ku saabsan Codka Baarlamaanka.

Waxaanu doonaynaa in aan caawino bulshadeena inay uga qaybgalaan si ixtiraam leh wada hadalka, barato wixii ku saabsan faa'iidooyinka doorashooyin guul leh, iyo inay fahmaan waxa qoritaanka "Haa" macneheedu tahay marka codka la bixinayo.

### Waa maxay Codka Baarlamaanku?

Codka Baarlamaanku waa koox madaxbanaan oo ah koox Aborijinal iyo Torres Strait Islander ah oo loo magacaabay inay talo ka siiyaan xukuumada go'aanada iyaga laga sameeyey. Codka Baarlamaanku wuxuu caawimi doonaa inuu jaheeyo Xukuumada laakiin ma yeellan doono awooda lagu sameeyo sharci.

Waxaa la soo jeediyey in la siiyo dadka Aborijinaalka iyo Torres Strait Islanders-ka in wax lagala qabto go'aanada iyaga saameeya. Asaasida Codka Dadkii ugu Horreeyey ee Baarlamaanka waxay ahayd mid ka ah mid tala-soojeedintii Baaqa Wadnaha ee Uluuru (Uluru Statement from the Heart). Akhri caddaynta taxanaha taariikheed oo buuxda.

### Sidee Codka Baarlamaanka loo asaasi doonaa?

Haddii doorashada lagu guulaysto, Baarlamaanku wuxuu la shaqayn doonaa bulshada Aborijinaalka iyo Torres Islander iyo dadweynaha guud si loo qoondeeyo Codka. Ka dib waxaa la samayn doonaa biilka Sharciga ka dibna waxaa la keenayaa Baarlamaanka. Biilkaan waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo guddiga baarlamaanka si loo soo jeediyo habab lagu wanaajiyo. Baarlamanaka ayaa go'aaminaya haddii ay qaanuun noqoto. Marka tani dhacdo, sharcigu wuu dhaqan gelayaa shaqada lagu dhiso codayna waa bilaabanaysaa.

### Waa maxay faa'iidada codka Haa ee dhammaan Australiyaanka?

Doorashadu waa fursada midoobida dhamaan reer Australiya.

Ugu codaynta Haa waa talaabo horay loogu qaaday sinnaanta midnimada, taas oo caawimaysa xiritaanka faraqa u dhexeeya dadka asaliga ah iyo dadka aan ahayn Australiyaanka asal ahaan. Dadka Aborijinaalka iyo Torres Strait Islander hadda waxay ku noolaadaan nolol gaaban, oo leh caafimaad aad u liita, waxaana la siiyaaa mushahar aad u hooseeya waxaana la yareeyey helitaanka kaabayaasha dhaqaalaha iyo waxbarasho marka la dhinac dhigo dadka aan ahayn Aborijinal iyo Torres Strait Islanders.

Ku codaynta Haa waxay aqoonsanaysaa Dadkayagii ugu Horeeyey dhaqankooda gaarka ah, dhaqan, taariikhda iyo xiriirkooda dhulkaan – waxayna noo suurtgelinaysaa in aan si fiican u dhegaysano kana barano dadka waaweyn sii wadida ku noolaanshaha dhaqanka adduunka.

Ku codaynta Haa waxay caawimaysaa Aborijinaalka iyo dadka Torres Strait Islanders-ka inay la wadagaan waaya-aragnimadooda iyo aqoonta maxaliga ah si loo siiyo caafimaad wanaagsan, waxbarasho iyo guriyeyn aqoonsanaysaa meel kasta oo ka mid ah Australia – danta dhamaan dadka reer Australia.

Ma bedeli karno taariikhdeena, laakiin wadajir ahaan ayaan horay ugu socon karnaa.

### Maxaa Magaalada Melbourne u kaalmaynaysaa ololaha Haa?

Magaalada Melbourne waxaa ka go'an ka jawaabida Caddaynta Baaqa Uluru oo Wadnaha ka timid iyo u yeerideeda codka, cahdi iyo runta.

Waxaanu aaminsanahay in aanaan ahaan karin magaalo dadka dhamaantiis ilaa dadku yeeshaan go'aanada saameeyey iyaga. Codka Baarlamaanku wuxuu siiyaa masrax dadka Aborijinaalka ah iyo Torres Strait Islander si ay codkooda u dhiibtaan.

Magaala tiraahda Haa waxay samaysaa caddayn xoogan oo ku saabsan cidda aan nahay, iyo waxaan wadajir ahaan awoodi karo. Waxaanu doonaynaa in aan talaabo horay u qaadno, wadajir ahaan. Sidaas darteed waxaanu leenahay Haa.

### Ma in aan cod ka bixiyaa doorashada?

Haddii aad ku qorto doorashada, waxaad ku qoran tahay codbixinta – taas oo macneheedu tahay waa inaad codka ka bixisaa doorashada.

Codkaagu waa wax ku ool. Xaqiiji in faahfaahinta is qoridaadu ay dhamaystiran yihiin **aec.gov.au**

### Xaggee macluumaad intaas ka badan ka heli karaa?

Heerka dawladeed ee ugu dhow dadka, golayaasha agtaada ah waxay leeyihiin door shaqaynaya oo muhiima si ay u qaataan doorka caawinta dadku inay sameeyaan go'aan ay ka warqabaan oo ku saabsan Codka baarlamaanka.

Macluumaad intaas ka badan, sawir ka qaad baaqa QR-ka
Ama booqo **melbourne.vic.gov.au/voice**

Waxaa ansixiyey Sally Capp oo joogta Melbourne iyadoo ku hadlaysaa magaca Golaha Degmada Melbourne.

Authorised by Sally Capp in Melbourne
on behalf of Melbourne City Council

VOICE TO PARLIAMENT

CITY OF MELBOURNE

# Baaqa Uluru wuxuu ka yimid qalbiga

Anagu, waxaanu ku kulanay 2017 National Constitutional Convention, annaga oo isugu nimid dhamaan qaybaha koonfureeed, caddayntaani waxay ka timid qalbiga:

Qabiiladayada Oborijinka iyo Torres Strait Islander ka waxay ahaayeen kuwii ugu horreeyey ummad madaxbanaan ee qaarada Australia iyo jasiiradaha ku dhegan, waxaana ku lahayn sharcigayaga iyo caadooyinkayaga. Tan waxaa sameeyey kuwaan ka soo farcanay, sida uu tibaaxayo dhaqankayagu, xagga Abuuritaanka 'waaya hore' iyo sida waafaqsan sayniska in ka badan 60,000 oo sandood.

Qaranimadaani waa mid ruuxi ah: abtirsiinyo u dhexaysa dhulka, ama 'dabeecada dhalasho', iyo dadka Aborijinalka iyo dadka Torres Strait Islander-ka ah kuwaas oo halkaas ku dhashay, joogtana ugu sugnaa, ayna waajib tahay in maalin uun ay ku noqdaan inay la midoobaan farcankoodii. Xiriirku waa asaaska lahaanshaha ciida, ama ka fiican, qaranimada. Weligeed kama tanaasulin ama iskama tuurin, waxayna la noolaayeen lahaanshaha qaranimada taajka.

Sidee bay u noqon kartaa si kale? Dadkaasi waxay lahaayeen dhul jira lixdan qarni xiriirkaas muqadaska ahina wuxuu ka baxay taariikhda adduunka in ka yar labadii boqol oo sano ugu dambaysay?

Isbedel wax ku oolla oo distuurka iyo dib u habaynta qaabka, waxaan aaminsanahay qaranimadaas hore inay soo noolaanayso iyada oo muujinaysa ummada reer Australia.

Saami ahaan, waxaanu nahay dadka lagu dulmiyey dunida dusheeda. Dabeecad ahaan ma nihin dad dambiilayaal ah. Carruurtayadii waxaa laga kaxeeyey qoysaskoodii tiro aan la qiyaasi karin. Taas macneheedu maaha uma hayno jacayl iyaga. Dhalintayaduna waxay ku rafaadaan xabsi iyagoo ah tira laga xishoodo. Waa inay ahaadaan rajadayada mustaqbilka.

Cabiradaas dhibkeenu wuxuu si cad u sheegaa dabeecad dhismeedka dhibaatooyinkayaga. Tani waa ciqaabta awood la'aantayada.

Waxaan doonaynaa dib-u-qaabayn distuur si loo xoojiyo dadkayaga ayna mawqif sax ah ka qaataan wadankayaga. Markaan awood u leenahay mustaqbilkayaga carruurtayadu waa guulaysanayaan. Waxay ku soconayaan laba adduun dhaqankooduna wuxuu ahaanayaa hadiyada wadankooda.

Waxaanu raadinaynaa asaasida codka Ummaddii ugu horaysay in lagu muujiyo distuurka.

Makarrata waa bar kulanka ugu sarraysa ajandahayaga: isu imaanshaha halgan dheer ka dib. Waxay qaadanaysaa rabitaankayaga cilaaqaad run ah oo xaq ah oo aan la leenahay dadka Australiya iyo mustaqbil fiican oo carruurtayada kuna salaysan cadaalad iyo ismaamul.

Waxaan raadinaynaa Guddiga Makarrata inay kormeeraan habka heshiis-samaynta u dhexeeya xukuumadaha iyo ummadihii ugu horreeyey iyo run ka sheegida taariikhdayada.

Sanadii 1967dii waa nala tiriyey, sanadii 2017 waxaan raadinay in nala maqlo. Waxaan ka tagnay kaamkii waxaana bilawnay socdaalkayagii ku soo wareegada dhulkaan ballaaran. Waxaanu idinku martiqaadaynaa inaad nala socotaan dhaqdhaqaaqa dadka Australiyaanka ah si loo hello mustaqbil wanaagsan.

We support THE ULURU STATEMENT